UK Health
Security
Agency

# La socoshada caabuqa laga qaado dhaawacyada qalliinka

## Macluumaadka loogu talagalay bukaanada







Warqadaan waxay sharaxaysaa caabuqa ku dhaca dhaawacyada qalliinka iyo barnaamijka qaran ee loogu tala galay la socoshada caabuqyada isbitaalada laga qaado

# Waa maxay caabuqyada laga qaado dhaawacyada qalliinka?

Inta badan dhaawacyada qalliinku waxay usoo bogsadaan si dhakhso ah ayaga oo aan wax dhibaato ah keenin. In yar oo kamid ah dhaawacyada qalliinka ayaa qaada caabuq. Tani waxay dhacdaa marka jeermisku (noolaha il-ma-aragtada ah iyo bakteeriyadu) soo galaan nabarka (dilaaca) dhakhtarka qalliinku ku sameeyo maqaarkaaga si uu qalliinka u fuliyo.

Jeermisyo badan ayaa ku nool gudaha iyo dusha jirkeena iyo sidoo kale bii'adeena. Intooda badan dhib ma keenaan ama xaataa faa'iido ayay leeyihiin. Jirkeenu wuxuu leeyahay difaacyo ka dhan ah jeermisyada waxyeelada noo gaysan kara. Maqaarkeenu sida caadiga ah wuxuu jeermiyada ka hor-istaagaa inay jikeena soo galaan, laakiin dilaac kasta oo ku yimaada maqaarka (haddii uu sababo dhaawac ama dilaac qalliin ah) wuxuu u ogolaan karaa inay soo galaan caabuqna nagu sababaan.

# Goorma ayay caabuqyadaanu yimaadaan?

Caabuqa dhaawaca qalliinku wuxuu imaan karaa mar kasta laga bilaabo laba ilaa saddex maalmood qalliinka kaddib ilaa dhaawacu kasoo bogsanayo (sida caadiga ah laba ilaa saddex todobaad qalliinka kaddib). Marar dhif ah, caabuqu wuxuu imaan karaa dhowr bilood kaddib qalliinka.

Caabuqyada ka dhasha dhaawacyada qalliinku inta badan ma dhacaan (eeg shaxda). Inta badan caabuqyada dhaawaca qalliinka ka dhasha waxay ku egyihiin maqaarka, laakiin waxay marar dhif ah ku faafaan qaybaha hoose ee jirka. Caabuqyadu waxay u dhow yihiin inay yimaadaan kaddib markii qalliin lagu sameeyo qaybo kamid ah jirka oo jeermisku ku badan yahay, sida dheefshiidka.

### Heerarka caabuqa qalliinka ka dhasha ee noocyada qalliimada kala duwan

| Nooca qalliinka | Celceliska tirada caabuqu ku dhaco ee dhaawacyada 100kii qalliinba* |
|---|---|
| Badalaadda kalagoyska lowga | In ka yar 1 |
| Badalaadda kalagoyska misigta | In ka yar 1 |
| Qalliinka saarista ilmagaleenka | 2 |
| Qalliinka xididada | 2 |
| Qalliinka furista xididada dhiigga wadnaha | 3 |
| Qalliinka caloosha weyn (dheefshiidka) | 9 |

* dhaawacyada caabuqu ku dhacay ee la ogaaday inta bukaanku isbitaalka kujiro ama dib loo soo celiyay qalliinka kaddib.
Isha xogta: UKHSA. Surveillance of Surgical Site Infections in NHS Hospitals in England.

# Sidee dhaawacayga loola soconayaa?

Inta aad isbitaalka joogto, kalkaalisada badalaysa maryahaaga dhaawaca ayaa ka eegaysa wax astaan caabuq ah. Haddii aad ka walaacsantahay dhaawacaaga, u sheeg kalkaalisada ku daryeelaysa. Ha iskudayin inaad maryaha iska furto, ama aad taabato dhaawacaaga ama aad wax ka daadiso. Waxaad si aan ulakac ahayn dhaawaca jeermis ugu soo qaadi kartaa farahaaga.

Caabuqu wuxuu imaan karaa marka aad isbitaalka ka tagto kaddib. Guduudasho iyo barar ayaa la filan karaa qalliinka kaddib, hase ahaatee waxaa laga yaabaa inaad caabuq qaaday haddii aad yeelato hal ama ka badan astaamaha soo socda:

- maqaarka ku hareeraysan dhaawacaaga oo guduuta nabarna yeesha aadna u aragto inaysan ahayn qayb kamid ah nidaamka soo bogsashada dhaawaca ee caadiga ah, ama aad dareemayso kulayl iyo barar
- dhaawacaagu wuxuu leeyahay dheecaan cagaar ama jaalle ah (malax)
- haddii aad dareemayso caafimaad-darro guud ama qandho, ama waxaad leedahay heerkul sareeya

Haddii aad dhibaato ku qabto dhaawacaaga, la xiriir dhakhtarkaaga guud (GP) haddii aan lagu farin inaad isbitaalka la xiriirto. Qiyaastii hal bil kaddib qalliinkaaga waxaad heli kartaa su'aalo (waraaq, iimayl ama farriin) ama wicitaan teleefoon oo kaaga imaanaya isbitaalka ayada oo lagu weydiinayo in wax dhibaato ah aad ku qabto dhaawacaaga iyo in kale. Bukaano badan waxay isbitaalka ka taga waxyar kaddib qalliinka shaqaalaha isbitaalkuna waxay u baahanyihiin inay wax ka ogaadaan caabuqyada dhaawacu sababo ee yimaada kaddib marka bukaanadu isbitaalka ka tagaan, ma ahan kaliya kuwa yimaada inta bukaanku isbitaalka jooogo.

# Maxaa dhacaya haddii aan astaamo yeesho?

Isbitaalkaagu wuxuu soo uruurin doonaa macluumaad ku saabsan qalliinkaaga wuxuuna dhaawacaaga ka eegi doonaa wax astaano caabuq ah. Haddii kalkaalisada, umulisada ama dhakhtarka ka shakiyaan inaad qabto caabuqyada dhaawacyada qalliinka ka dhasha, waxay baaritaan ku samayn doonaan oogada dhaawaca ayaga oo dheecaan ka qaadaya waxayna u dirayaan shaybaarka si loo baaro. Kalkaalisadaada ama dhakhtarkaagu waxay kuu qori karaan daawooyin qalajiyeyaal ah. Macluumaadka laga ururiyay qalliinkaaga waxaa isticmaalaya isbitaalka si uu kuu siiyo daryeelka qofeed ee ugu wanaagsan.

# Yaa macluumaadkayga lala wadaagi doonaa?

UK Health Security Agency (UKHSA) waxay mas'uul ka tahay caabuqyada dhaawacyada qalliinka ee isbitaalada England oo dhan. Si uu arintaan gacan uga gaysto, isbitaalkaagu wuxuu macluumaadka qalliinkaaga la wadaagayaa UKHSA, waxaana kujira magacaaga, taariikhda aad dhalatay, jinsiga iyo lambarka NHS. Sidoo kale macluumaadka lala wadaagayo ee ku saabsan khatarta aad ugu jirto caabuqa dhaawaca qalliinka ka dhasha, waxaa kamid ah:

- heerka caafimaadkaaga guud qalliinka kahor
- macluumaadka ku saabsa qalliinkaaga
- macluumaadka caabuq kasta oo aad qaaday qalliinkaaga kaddib

UKHSA waxay u baahan tahay inay macluumaadka shakhsiga ah adeegsato si ay u hubiso tayada iyo saxnaanta macluumaaka nooga imaanaya isbitaalka una hubiso in aanaan bukaanka tirin hal mar ka badan. Waxaan sidoo kale macluumaadkaan u isticmaalnaa inaan ku xirno xogaha NHS haddii isbitaalka laguugu soo celiyo qalliinkaaga kaddib, iyo haddii aad yeelato wax khatar ah oo keenaysa caabuq sida cudurka macaanka. Tani waxay saynisyahanadeena caafimaadka bulshada ka caawinaysaa inay qiimeeyaan heerka caabuqyada qalliinka ka dhasha ee isbitaalada waxayna gacan ka gaysnaaysaa hagaajinta daaweynta la siiyo bukaanada. Intaas waxaa dheer, waxaan sidoo kale ku xiraynaa xogaha dhimashada caruurta ee ka imaanaya Xafiiska Tirakoobka Qaranka (Office for National Statistics) si loo eego in bukaan qabay caabuq ka dhashay qalliin uu u dhintay caabuqaan.

Macluumaadkaaga waxaa sidoo kale laga yaabaa in lagu xiro xogta shaybaarka caabuqyada ee UKHSA si looga raadiyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caabuqyada caafimaadka. Waxaan sidoo kale macluumaadkaaga ku xiri karnaa xogaha ay hayaan diiwaanada kale ee caafimaadku, kuwaas oo ay kujiraan macluumaad qalliin oo faahfaahsan oo dheeraad ah sida noocyada qalabka qalliinka la adeegsaday.

Lambarkaaga moobeelka iyo iimaylkaaga, ama kuwa qofka adiga kaa wakiilka ah ayaa lala wadaagi karaa UKHSA. Arintaan waxaa loo samaynayaa si aan u awoodno inaan kuu soo dirno su'aalaha soo bogsashada dhaawaca anaga oo kuugu soo dirayna iimaylka ama farriin ahaan si aad usoo buuxiso oo aad usoo celiso UKHSA.

# Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad badan oo ku saabsan caabuqyada qalliinka ka dhasha?

Waxaad macluumaad badan oo caabuqyada dhaawaca qalliinka ka dhasha ah ka heli kartaa webseedka UKHSA www.gov.uk/government/collections/surgical-site-infection-ssi-guidance-data-and-analysis

# Halkee ayaan ka heli karaa macluumaad badan oo ku saabsan UKHSA?

Waxaad wax badan oo ku saabsan sida UKHSA ay u istcmaalayso macluumaadkaaga gaarka ah si ay ula socoto caabuqyada dhaawacyada ka dhasha ka heli kartaa www.gov.uk/guidance/surgical-site-infection-surveillance-privacy-notice

Waxaa soo saaray UKHSA waxaana loogu talagalay bukaanada qaliinkooda lala soconayo si waafaqsan Adeegyada La socoshada Caabuqyada Barta Qalliinka ee UKHSA.

| Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo kale, fadlan la xiriir: |
| --- |
| |

Waraaqdaan waxay sidoo kale u diyaarsantahay qaabka dhagooleyaasha ee luuqadaha soo socda, tusaale ahaan: Carabi, Bengali, Shiinays (Kan la fududeeyay ama kii Hore), Gujarati, Polish, Punjabi iyo Urdu. Waxaad macluumaadka kala soo degi kartaa www.gov.uk/ukhsa

Waxaad dib u isticmaali kartaa macluumaadkaan (adoo ka reebaya sumadaha) si bilaash ah qaab walba iyo hab walba, si waafaqsan shuruudaha Open Government Licence (OGL) v3.0. Si aad shatigaan u aragto, booqo OGL www.nationalarchives.gov.uk/doc/open-government-licence/version/3/. Meelaha aan ku muujinay macluumaad ku saabsan xuquuqda lahaanshaha oo dhinac sadexaad ah waxaad u baahan doontaa inaad oggolaansho ka hesho cidda ay khusayso ee xuquuqda iska leh.

UKHSA waxay mas'uul ka tahay inay ka ilaaliso xubin walba oo kamid ah bulsho walba saamaynta cudurada faafa, kiimikada, noolaha ah, dhacdooyinka shoocaaca iyo nukleerka ah iyo khataraha kale ee caafimaadba. Waxaan ku bixinaa hogaamin dhanka garaadka, sayniska iyo waxqabadka ah heer qaran iyo heer gobolba, iyo sidoo kale fagaareyaasha caalamka, si aan caafimaadka qaranka uga dhigno mid sugan.

www.gov.uk/government/organisations/uk-health-security-agency

**Ulotka ta jest również dostępna w języku polskim**
ਇਹ ਪਰਚਾ ਪੰਜਾਬੀ ਵਿੱਚ ਵੀ ਉਪਲਬੱਧ ਹੈ
**এই প্রচারপত্রটি বাংলা ভাষায়ও পাওয়া যায়**
**આ પત્રિકા ગુજરાતી ભાષામાં પણ ઉપલબ્ધ છે**
本宣传单还提供有中文(简体)版本
本宣傳單還提供有中文(繁體)版本

تتوفر هذه الكراسة أيضاً باللغة العربية.
یہ پرچہ اُردو میں بھی دستیاب ہے

© Crown copyright 2025

Wixii su'aalo ah oo dukumiintigaan la xiriira, fadla la xiriir:
ssi.data@ukhsa.gov.uk

Waxaa la daabacay: Juun 2025
Tixraaca daabacaadda: GOV-11041
Photos © Shutterstock

Corporate member of Plain English Campaign
Committed to clearer communication
339

UKHSA waxay taageertaa Hadafyada Horumarineed ee Waara

SUSTAINABLE DEVELOPMENT GOALS